

Barnaamijka North Star Promise

*Waa deeq cusub oo ka dhigta kuleejka mid
ay awoodi karaan dad badan oo reer Minnesota*

Laga bilaabo deyrta 2024, Barnaamijka Deeqda Waxbarashada ee North Star Promise (NSP) ayaa ka dhigi doona kuleejka mid la awoodi karo ay awoodi karaan qof kasta oo reer Minnesota ah oo raba inuu helo xirfado waxbarasho. Barnaamijku wuxuu dabooli doonaa kharashka guud ee waxbarashada iyo kharashaadka dadka reer Minnesota ee dhigta machadyada dadwaynaha iyo kuleejyada qabiilka ee gobalka kuyaala.

NSP waxaa awooda lagu saaraa inay saameyn fican ku yeelato meelo badan:

- Waxay gacan ka geysataa xasilinta diiwaan gelinta machadyada guud ee waxbarashada sare ee Minnesota;
- Waxay u adeegtaa sida jiheeyaha dhaqaalaha Minnesota waxaana wax lagu baraa shaqaalaha xirfada leh ee aadka loogu baahan yahay inay buuxiyaan boosaska ka bannaan shaqaalaha gobolka;
- Si ay u abuurto dariiq waxbarasho oo sare oo macquul ah oo loogu talagalay dadka degan Minnesota kuwaas oo laga yaabo in ay horey u malaynayeen in waxbarashadu aysan suurtagal u ahayn iyaga.

Shuruudaha iyo Tacliinta U qalmida

- ✓ Waa inaad tahay arday degan Minnesota
- ✓ Waana in qoyskaagu helaa dakhliga guud ee Hoose (AGI) sida lagu qeexay Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Dhaqaalaha ardayga (FAFSA) ama Codsiga Xeerka Riyada Minnesota ee ka hooseya \$80,000
- ✓ Waa inaad dhigato Machadka dadwaynaha ee Waxbarashada sare oo Minnesota kuyaala ama Kuleej Qabiil
- ✓ Waa inaad xaalad gobal ama federaal oo cakiran oo amaah kujirin
- ✓ Waa inaad ka qoran tahay diiwaangelin qaadanaysa ugu yaraan hal buundo
- ✓ Waa inaad kasoo baxdo heerarka Horumarka Tacliinta ee Qanaacaada leh (SAP)
- ✓ Waa inaad horey u helin shahaadada baccalaureate
- ✓ Waa inaad ka diiwaangashan barnaamij ama koorso waxbarasho ee khuseysa shahaadada koowaad ee jaamacada, dibloomada ama shahaado

Maxaa lagu Daboolaa?


NSP waxay dabooli doontaa kharashka guud ee waxbarashada iyo kharashaadka, deeqda waxbarashada kadib, deeqaha, dhaaftaanada waxbarashada ayaa la codsaday.

Machadyada u Qalmada

- ✓ Dhammaan kuleejyada Minnesota iyo jaamacadaha
- ✓ Dhammaan Jaamacadaha Minnesota nidaamka Kaambaaska
- ✓ Dhammaan kuleejyada Qabiilka

Saameynta North Star

Sida la qiyaasay 15,000 arday ayaa ka faa'iideysan doonta NSP marka koowaad sanad dugsiyeedka la hirgeliyo.



**Iskaam mari
Koodhka QR-ka
si aad u barato
xog dheeraad ah**



Barnaamijka North Star

TILMAAMAHA CODSIGA IYO
FAAHFAAHINTA ABAALMARINTA



Wax ka qabashada caqabadaha dhaqaalaha: Yoolkaaga kuleejka waa mid cad marka la  kaashado North Star Promise

Cadadka Lacagta Abaalmarinta ugu Badan

Ma jiro waqtiga ugu badan ee ardaydu heli karaan NSP, laakiin waxa jira xadad buundooyin oo ku xeeran.

Ardayda helaya a:

Shahaadada 2-da sano ah:

Waxay helaan NSP ah illaa 60 dhibcood

Shahaadada Koowaad ee Jaamacada ee 4-ta sano:

Waxay helaan NSP ah illaa 120 dhibcood

Lacagta Ugu dambeysa ee Deeqda Waxbarashada

NSP waa barnaamijka "lacagta ugu dambeysa", oo tixgalinaysa ilo kasta oo kale oo ah maalgelinta kaalmada hadiyada ee ardaydu helaan, kahor inta aan abaalmarinta la meelmarin.

Ujeedada istaraatiijiyadaan waa in laga faai'ideysto dhammaan gargaarka bilaashka ah ee federaalka, gobolka, kuwa gaarka ah iyo hay'adaha si loo siiyo ardayda u qalma ee ugu badan ee macquulka ah waxbarasho iyo iyo hadaf bilaash ah oo ay ku helayaan waxbarashada kuleejka.

Sideen u codsadaa?

Ardaydu waxay codsan karaan ayagoo buuxinaya:

- Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardayga ee Federaalka (FAFSA) www.studentaid.gov ama
- Xeerka Riyada Minnesota oo laga codsan karo www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct

Maxaa dhacay Kadib?

Kuleejka ama jaamacada aad gelayso ayaa qiimeyn doona u qalmidaada teeram ka teeram aasaaska iyo abaalmarinta Deeqaha waxbarashada North Star Promise ee dhammaan ardayda u qalanta.

Waxaa la xisaabin doontaa kharashka abaalmarintaada ee kuleejka ama jaamacada. Waxay go'aamin doonaan kharashka waxbarashadaada iyo khidmadaha loo baahan yahay, waxayna jaraan dhammaan ilaha kale ee kaalmada hadiyada (deeqaha waxbarashada, deeqaha, dhaafitaanka iyo gunnooyinka) waxayna ku abaal-marin doonaan inta hartay ee deeqda waxbarasho North Star Promise. Ardayda waxaa lagu wargelin doonaa iyadoo loo maraayo nidaamka abaalmarinta heerka kuleejka ama jaamacada.

Imisa lacag ah ayaan heli karaa?

Majiraan xadid lacageed oo ugu badan oo la dejiyay teeramkii, sanadkii, ama guud ahaan oo aad heli karto. Cadadka lacagta aad helayso waxaa lagu saleyn doonaa "doolarkii ugu danbeeyay" iyo xisaabinta u qalmidaankaaga la sameeyo teeram walba. Waxaad heli kartaa ilaa 100% oo ah lacagta lagugu dalaco waxbarashada iyo khidmadaha loo baahan yahay xilli kasta, marka laga reebo dhammaan ilaha kale ee kaalmada hadiyada ee aad hesho. Waa inaad sii wado buuxinta heerarka Horumarka Tacliinta ee Qanaacada leh (SAP) ee dugsiigaaga.

Haddii maalgelino la heli karo, ardayda baahida ugu badan qaba waxay sidoo kale heli karaan lacagaha North Star Promise Plus. **Fiiro gaar ah: Faahfaahino ku saabsan bixinta North Star Promise Plus ee barnaamijka ayaa wali la go'aaminayaa.**

Suaalaha ku saabsan Barnaamijka ma qabtaa? La xariir:

NorthStarPromise.OHE@state.mn.us